



UJEEDO: HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO BOOS BANAAN "LEHNA SHARCI MUNICIPALLE AH"

Maanta oo ay taariikhdu tahay **24/01/2023**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iyyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

ISKA IIBIYE:- SAALAX C/RAXMAAN JIMCAALE MAALIN, Hooyo: Muumino Cali Xayle, Somali ah, Ku Dhashay: C/buur, Sanadkii: 1979, Degan Muqdisho, Sita: Somali Passport, Lr. P00792162.

IIBSADE:- MUXYADIIN AXMED MAX'UD MAXAMED, Somali ah, Hooyo: Salaado Cali Cawaale, Ku Dhashay: Hobyo, Sanadkii: 1985, Degan Muqdisho.

WAKIILKA IIBSADAHA:- Salaad Axmed Cali.

TILMAAMAHA DHULKA LA KALA IIBSANAAYO
Dhul Banaan oo Ku yaal: **Muqdisho**, Degmada: **(W/leey)** Cabirka: **(20X15)-M**, Lotoo No: **01064-Q**, Lehna W.M.L: **(14815/21)**, Tr. 17/11/2021, Kana Soo Baxay Nootaayo Tiikey, Uuna Saxiixay Dr. C/risaaq Maxamed C/le (Tiikey)

SOOHDINTA DHULKA

Bari: Dhul dad, Koonfur: Dhul dad, Galbeed: **Jid**, Waqooyi: **Jid**

QIIMAHA DHULKA: USD \$23,500 (Labaatan iyo Saddex Kun iyo Shan Boqol oo Doolarka Mareykanka ah).

B- Aniga oo ah **SAALAX C/RAXMAAN JIMCAALE MAALIN**, Waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa aniga oo maskax ahaan iyo Jir ahaanba ka fiyoow in aan ka gaday kuna wareejiyey **MUXYADIIN AXMED MAXAMUUD MAXAMED** Dhulkayga banaan oo tilmaamihiisu sare ku xusan yahay, Waxaan kale oo aan Cadaynayaa in dhulkaan uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale, iyo wax kasta oo horjoogsan kara heshiiskan, Sidaas daraadeed Wixii Ceebaal ah, ee Ka Yimaada Dhulkaan Sida Danguud, Dukuminti Ka Horeeyey dukumintigaan, dukuminti been abuur ah, ama Duris Sharci iyo Wixii La Mid ah aniga ayaa Mas'uul Ka ah, Waxaan Kale oo Cadaynayaa in aan Qaatay Dhamaan Lacagta Sare Ku Xusan.

T- Aniga oo ah **SALAAD AXMED CALI** Ahna Wakiilka Iibsadaha dhulkaan, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan u Gudoomay Iibsadaha Milkiyada Dhulkaan una Saxiixay Beecaan.

SAXIIXA ISKA IIBIYAHA DHULKA

SAALAX C/RAXMAAN JIMCAALE MAALIN

Saalax

SAXIIXA WAKIILKA IIBSADAHA

SALAAD AXMED CALI

Salaad

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- DAAHIR MAX'UD DHAGEEY

2- AXMED MAXAMED CIGAAL

3- C/LAAHI MUD JIMCAALE

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 500/T.P.N/23, Tr. 24/01/2023, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo", Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- Saalax C/raxmaan Jimcaale Maalin** Ahna (Iska iibiye), **2- Salaad Axmed Cali** Ahna Wakiilka Iibsadaha) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Beecaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

By: Sakariye



NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"

Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"

MASAWIKA ISKA IIBIYAHA

SAALAX C/RAXMAAN JIMCAALE MAALIN



MASAWIRKA WAKIILKA IIBSADAHA

SALAAD AXMED CALI



MASAWIRKA MARKHAATIYAASHA

1-DAAHIR MAXAMUUD DHAGEEY



2-AXMED MAXAMED CIGAAL



3-C/LAAHI MAX'UD JIMCAALE



UJEEDDO: HESHIIS KALA GADASHO DHUL BANAAN OO MENUICIPALE AH

Muqdisho, Maanta oo ay taariikhdu tahay **17 Bisha November Sanadka 2021 (17/11/2021)**, Anigoo ah **Dr. C/risaaq Maxamed Cabdulle (Tiikay)**, Xafiisna ku leh Suuqa Bakaaraha ee Wadada H/Wadaag, waxaa Xafiiska iigu yimid ayagoo heshiis ah dadka hoos ku xusan ina weydiisteen in aan u kala qoro heshiiskooda ujeedada sare xusan. waana sida soo socota macluumaadka oo dhameystiran:-

Anigoo ah **Nuur Xaashi Cumar Kheyre** Hooyo **Cibaado Rooble Wehliye** Ku dhashay **G/kacyo, 1979 (Gade)** lehna **ID 27904027455006/Xamar**, waxaan qoraalkan aan ku caddeynayaa anigoo dhinac kasta ka caafimaad qaba raalina ah in aan ka gaday kuna wareejiyay **Saalax C/raxmaan Jimcaale Maalin (Iibsade)** **Dhul Banaan** oo uu ku qoran yahay **Xalane C/laahi Xasan** oo ku yaal **Xamar, Deg.W/leey** lehna **WML12,759/2021 Tr. 06/07/2021** Kana soo baxday Nootaayaha **Dr. C/risaaq Maxamed C/le (Tiikay)** cabirkiisuna dhan yahay **20X15 Lr.01064-Q** sohdimihiisuna kala yihiin, **Waqooyi Jid, Galbeed Jid**, inta kalana waa **Dhul Dad** kuna gaday **Wakaalad Guud 14,720/2021 Tr. 11/11/2021** kana soo baxday Nootaayaha **Dr.C/risaaq Maxamed Cabdulle(Tiikay)**. Waxaana layga siiyay **\$20,000 (Labaatan kun oo dollar)** dhamaan lacagtaas waan wada qaatay. Sidaas darteed wixii ceebaal ah ee ka yimaada sida dhul Danguud, Dukuminti ka horeeyey dukumintigaan, iyo wixii lamid ah aniga ayaa ka masuul ah.

Anigoo ah **Saalax C/raxmaan Jimcaale Maalin**, Ina Muumino Cali Xeyle Ku dhashay **Ceelbuur, 1979** waxaan dhankeyga cadeynayaa in aan aqbalay kuna qancay iibkan kor ku xusan isla markaasna aan la wareegay dhulkaan oo dhameystiran.

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1) C/rashiid C/Kariin Cabdi

2) Cali Axmed Xeyd

3) Daahir Maxamuud Dhageey

SAXIIXA GADAHA

Nuur Xaashi Cumar Kheyre

SAXIIXA IIBSADAHA

Saalax C/raxmaan Jimcaale Maalin

Ref.14,815/2021

NOOTAAYAHA (Notary Certification)

Anigoo ah **Dr.C/risaaq Maxamed C/le(Tiikay)** xafiisna ku leh Suuqa Bakaaraha waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare ku xusan ay yihiin kuwii runta ahaa ee **Gadaha, Iibsadaha** iyo **Markhaatiyaasha** wehliyey ee sare ku xusan. Dhamaan dadkaas waxay qoraalkaan wada saxiixeen iyagoo xis qaba oo wada raalli ah.




NOTAAYAHA

Dr.C/risaaq Maxamed C/le(Tiikay)


BY.admin

MASAWIRKA MARKH,1AAD




C/rashiid C/kariin Cabdi

MASAWIRKA MARKH,2AAD




Cali Axmed Xeyd

MASAWIRKA MARKH,3AAD



Daahir Maxamuud Dhageey

MASAWIRKA ISKAGADAHA



Nuur Xaashi Cumar Kheyre

MASAWIRKA IIBSADAHA



Saalax C/raxmaan Jimcaale

Bere
P. 500/T.P.N/23
T. 24/1/23
20X15-M
L. 01064-♀



Form 10

A



Xaashida Sare
ORIGINAL

JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

No.

547005


XISAABIYAHA GUUD EE DOWLADDA

Lacag Qabasho Guud
(GENERAL RECEIPT)

Meesha *SA* Taariikh *21-11-2021*
 Waxaa laga qabtay *Nuur Xaari Cumar Khaire*
 Lacag dhan Sh. *Laba Reel ka fur*
 Oo ah

FAAHFAAHIN

Madaxa	M-xige	Sh.	Sent
	<i>Haar</i>	<i>\$ 200</i>	
		<i>\$ 4</i>	
Saxiixa lacag qabtaha	Isugeyn Guud	<i>\$ 204</i>	
Jagada			



Dhiibaha Lacagta - Original
 Xis-Guud Dawladda - 2nd COPY
 Buugga Avuu ku Harayaa 3rd COPY



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMALIYA
Wasaaradda Maaliyadda
Waaxda Canshuuraha Barriga
WARQADDA RUQSADA GADIDDA HANTIDA

TIRSI# : 2021 - TRS-115339



Waaxda Canshuuraha Barriga ee Wasaaradda Maaliyadda Waxey Ruqseysay Wareejinta Hantida ay faahfaahinteedu hoos ku xusan tahay:

NOOCA HANTIDA MA GUURTADA AH:

LOT NUMBER

TITLE DEED NO

DEGMADA

CABIRKA

CIDDA WAREEJINEYSA

CIDDA LAGU WAREEJINAYO

NOTARY

NOTARY REF

QIIMAHA LAGU KALA GATAY

Taariikda la bixiyey:

21/11/2021 00:00:00



TRS-115339

Waaxda Canshuuraha Barriga



JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال

SOMALI REPUBLIC


WARAQADDA AQQOONSIGA

بطاقة الهوية

IDENTITY CARD



L. Qaranka/رقم الهوية/National ID
27904027455006



Magaca/الاسم/Name

NUR

HASHI OMAR



Taariikhda dhalashada/الميلاد/Birth

02 Apr 1979

GALKAIO

Taariikhda la bixiyay/الاصدار/Issue

03 Mar 2018

GALKAIO

Taariikhda uu dhacayo/الانتهاء/Expiry

02 Mar 2023

Lab/Dheddig/الجنس/Gende

MALE

UJEEDDO:-WAKAALAD GUUD

Muqdisho, maanta oo ay taariikhdu tahay 11 bisha Nov ee sanadka 2021(11/11/2021)


Anigoo ah Dr. C/risaaq Maxamed C/le (Tiikey), waxaa xafiiskeyga iigu yimid dhinacyada hoos ku xusan.

Anigoo ah Xalane C/laahi Xasan Ina Booto Maxamed Guure ku dhashay G/kacyo 1991 lehna ID Lr.29105145753741/Xamar Waxaan qoralkan ku caddeynayaa anigoo dhinac kasta ka caafimaad qaba raallina ah in aan wakiishay Nuur Xaashi Cumar Kheyre una wakiishay dhammaan hantideyda guurto iyo ma guurto in uu ii soo gadi karo, siina gadi karro, maamuli karo , dhisi karo, kireyn karo , u dacwoon karo, qareen u qaba karo.


Anigoo ah Nuur Xaashi Cumar Kheyre , Ina Cibaado Rooble Wehliye Ku dhashay G/kacyo 1979 waxaan dhankayga aan caddeynayaa in aan aqbalay wakaaladda sare ku xusan isla markaasna aan sida ugu wanaagsan uga soo bixi doono waajibkeeda haddii Alle Idmo.

SAXIIXA MARKHAATIYAAYSHA

1-Daahir Maxamuud Dhageey




2- Hanad Bashiir Xasan




SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA

Xalane C/laahi Xasan



SAXIIXA LA WAKIISHAHA

Nuur Xaashi Cumar Kheyre



Ref.14,720/2021

NOOTAAYAHA (Notary Certification)

Anigoo ah Dr.C/risaaq Maxamed C/le(Tiikey)xafiisna ku leh Suuqa Bakaaraha waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare ku xusan ay yihiin kuwii runta ahaa Wakaalad bixiyaha, la wakiishaha iyo markhaatiyaasha wehliyey ee sare ku xusan. Dhamaan dadkan waa loo wada akhriyey qoraalkan ka dibna wey wada saxiixeen ayagoo dhinac kasta ka caafimaad qaba oo wada raalli ah.



NOTAAYAHA

(Dr.C/risaaq Maxamed C/le(Tiikey))

MASAWIRKA MARKH,1AAD




Daahir Maxamuud Dhagey

MASAWIRKA MARKH,2AAD



Hanad Bashiir Xasan

MASAWIRKA WAKIISHAHA



Xalane C/laahi Xasan

MASAWIRKA LAWAKIISHAHA



Nuur Xaashi Cumar Kheyre

JAMHURIYADDA SOOMALIYA

جمهورية الصومال


SOMALI REPUBLIC

WARAQADDA ADOONSIGA

بطاقة الهوية

IDENTITY CARD

Qoranka / رقم الهوية / National ID
29105145753741



Magaaca / الاسم / Name
HALANE
ABDULLAHI HASSAN



Taariikhda dhalashada / الميلاد / Birth
14 May 1991
GALKAIO



Taariikhda la bixiyay / الاصدار / Issue
01 Oct 2020
GALKAIO

Lab / Dheddig / الجنس / Gend
MALE

Taariikhda uu dhacayo / الانتهاء / Expiry
30 Sep 2025

UJEEDDO: HESHIIS KALA GADASHO DHUL BANAAN OO MENCUPALE AH

Muqdisho, Maanta oo ay taariikhdu tahay **06 Bisha July Sanadka 2021 (06/07/2021)**, Anigoo ah **Dr. C/risaaq Maxamed Cabdulle (Tiikey)**, Xafiisna ku leh Suuqa Bakaaraha ee Wadada H/Wadaag, waxaa Xafiiska iigu yimid dadka hoos ku qoran ina waydiisteen in aan u kala qoro qoraalka soo socda:-

Anigoo ah **Tahliil Axmed Guuleed** Hooyo **Xaawo Ciise Faarax** Ku dhashay **G/kacyo, 1977 (Iskagade)** lehna **Licence 18216/Xamar**, waxaan qoraalkan aan ku caddeynayaa anigoo dhinac kasta ka caafimaad qaba raalina ah in aan ka gaday kuna wareejiyay **Xalane C/laahi Xasan (Iibsade)** Dhul Banaan oo ku yaal **Xamar, Deg.W/leey** lehna **WML12520/2021 Tr. 21/06/2021** Kana soo baxday Nootaayaha **Dr.C/risaaq Maxamed C/le (Tiikey)** cabirkiisuna dhan yahay **20X15 Lr.01064-Q** sohdimihiisuna kala yihiin, **Waqooyi Jid, Galbeed Jid**, inta kalana waa Dhul Dad. Waxaana layga siiyay **\$17,500 (toban iyo todoba kun iyo shan boqol oo doolar)** dhamaan lacagtaas waan wada qaatay. Sidaas darteed wixii ceebaal ah sida dhul Danguud, Dukuminti ka horeeyey dukumintigaan, iyo wixii lamid ah aniga ayaa ka masuul ah.

FG. Asalka=Cali Cumar Calasoow (BB/113/26/2003 TR.7/8/2003 Ressid Ir.10376 TR.7/8/2003 Cabirka 40X120 Lotteo Lr.01051 ilaa 01066-Q D.H.X)

Anigoo ah **Nuur Xaashi Cumar** una saxiixay iibkaan **Xalane C/laahi Xasan**, Ina **Booto Maxamed Guure** Ku dhashay **G/kacyo, 1991** waxaan dhankeyga cadeynayaa in aan u aqbalay kuna qancay iibkan kor ku xusan.

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1) Daahir Maxamuud
Dhageey



2) Hanad Bashiir Xasan



SAXIIXA ISKAGADAHA
Tahliil Axmed Guuleed



SAXIIXA WK.IIBSADAHA
Nuur Xaashi Cumar



Ref.12,759/2021

NOOTAAYAHA (Notary Certification)

Anigoo ah **Dr.C/risaaq Maxamed C/le(Tiikey)** xafiisna ku leh Suuqa Bakaaraha waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare ku xusan ay yihiin kuwii runta ahaa ee **Iskagadaha, Wk.Iibsadaha** iyo **Markhaatiyaasha** wehliyeey ee sare ku xusan. Dhamaan dadkaas waxay qoraalkaan wada saxiixeen ayagoo xis qaba oo wada raalli ah.

NOTAAYAHA

Dr.C/risaaq Maxamed C/le(Tiikey)



BY.admin

MASAWIRKA MARKH.1AAD




Daahir Maxamuud Dhagey

MASAWIRKA MARKH.2AAD




Hanad Bashiir Xasan

MASAWIRKA ISKAGADAHA



Tahliil Axmed Guuleed

MASAWIRKA WK.IIBSADAHA



Nuur Xaashi Cumar


REF. 10. 815/2021
T. 17/11/2021

20X15
W. 01064-Q


Ref 12,759

Dawladda Federaalka Soomaaliya | **Federal Republic of Somalia**
Wasaaradda Gaadiidka | **Ministry of Transportation**

Aqoonsiga Dereewalka | Driving License

	18216	17/02/2016
Tahaliil Axmed Guuleed		17/02/2019
Somali		
01/01/1977		
Mogadishu		
D		

Jahanssi





JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMALIYA
Wasaaradda Maaliyadda
Waaxda Canshuuraha Barriga
WARQADDA RUQSADA GADIDDA HANTIDA

TIRSI# : 2021 - TRS-093648



Waaxda Canshuuraha Barriga ee Wasaaradda Maaliyadda Waxey Ruqseysay Wareejinta Hantida ay faahfaahinteedu hoos ku xusan tahay:

NOOCA HANTIDA MA GUURTADA AH:

DHUL BANAAN

LOT NUMBER

01064-Q

TITLE DEED NO

WML 12520/2021 TR21/06/2021

DEGMADA

Warta Nabadda

CABIRKA

20X15

CIDDA WAREEJINEYSA

TAHLIL AXMED GUULEED

CIDDA LAGU WAREEJINAYO

XALANE C/LLAHI XASAN

NOTARY

TIIKEY

NOTARY REF

12,759/2021

QIIMAHA LAGU KALA GATAY

\$17,500.00

Taariikda la bixiyey:

08/07/2021 00:00:00



TRS-
093648

Waaxda Canshuuraha Barriga



UJEEDDO: HESHIIS KALA GADASHO DHUL BANAAN OO MENCIPALE AH

Muqdisho, Maanta oo ay taariikhdu tahay **21 Bisha June Sanadka 2021 (21/06/2021)**, Anigoo ah **Dr. C/risaaq Maxamed Cabdulle (Tiikey)**, Xafiisna ku leh Suuqa Bakaaraha ee Wadada H/Wadaag, waxaa Xafiiska iigu yimid dadka hoos ku qoran ina waydiisteen in aan u kala qoro qoraalka soo socda:-

Anigoo ah **Shiine Daahir Axmed Xeyd** Hooyo **Maryan Naxar Shibane** Ku dhashay Qoryoleyey **1985 (Iskagade)** lehna ID Lr.01420710/Xamar waxaan qoraalkan aan ku caddeynayaa anigoo dhinac kasta ka caafimaad qaba raalina ah inaan ka gaday kuna wareejiyay **Tahliil Axmed Guuleed (Iibsade)** Dhul Banaan oo ku yaal Xamar, Deg.W/leey lehna WML11,757/2021 Tr.3/04/2021 Kana soo baxday Nootaayaha **Dr.C/risaaq Maxamed Cabdulle (Tiikey)** cabirkiisuna dhan yahay **20X15 Lr.01064-Q** sohdimihiisuna kala yihiin, **Woqooyi Jid, Galbeed jid**, inta kalana waa Dhul Dad. Waxaana layga siiyay **\$15,000 (toban iyo shan kun oo dollar)** dhamaan lacagtaas waan wada qaatay. Sidaas darteed wixii ceebaal ah sida dhul Danguud, Dukuminti ka horeeyey dukumintigaan, iyo wixii lamid ah aniga ayaa ka masuul ah.

Anigoo ah **Tahliil Axmed Guuleed** Ina **Xaawo Ciise Faarax** Ku dhashay ku dhashay **G/kacyo 1977** waxaan dhankeyga cadeynayaa in aan u aqbalay kuna qancay iibkan kor ku xusan.

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1) Daahir Maxamuud Dhageey

2) Xuseen Cumar Xeyd

3) Maxamed Daahir Axmed

SAXIIXA ISKA GADAHA

Shiine Daahir Axmed Xeyd

SAXIIXA IIBSADAHA

Tahliil Axmed Guuleed

Ref.12,520/2021

NOOTAAYAHA (Notary Certification)

Anigoo ah **Dr.C/risaaq Maxamed C/le(Tiikey)** xafiisna ku leh Suuqa Bakaaraha waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare ku xusan ay yihiin kuwii runta ahaa ee **Iskagadaha iibsadaha**, iyo **Markhaatiyaasha** wehliyey ee sare ku xusan. Dhamaan dadkaas waxay qoraalkaan wada saxiixeen ayagoo xis qaba oo wada raalli ah.

NOTAAYAHA
Dr.C/risaaq Maxamed C/le(Tiikey)




MASAWIRKA MARKH,1AAD



*Daahir Maxamuud Dhagey
Xasan*

MASAWIRKA MARKH,2AAD




Xuseen Cumar Xeyd

MASAWIRKA MARKH,3AAD




Maxamed Daahir Axmed

MASAWIRKA ISKAGADAHA



Shiine Daahir Axmed Xeyd

MASAWIRKA IIBSADAHA



Tahlil Axmed Guuleed

Ref-12,759/2021

Tv. 6/7/2021

20X15

v. 01064-G

Ref 721520

Computer Serial #
0142070



**DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
MUNICIPALITY OF MOGADISHU**

WARQADDA SUGNAANTA

(Certificate of Identity confirmation)

**DUQA MAGAALDA MUQDISHO WUXUU CADDEYNAYAA IN SAWIRKA IYO SUUL SAARIDDA
HOOS KU TILMAAMAN UU YAHAY QUFKA HOOS KU XUSAN:**

(The Mayor of Mogadishu hereby certifies that the person whose picture and thumb print appears hereon has the following details:)

MAGACA	SHINE DAAHIR AHMED
Full Name	
TAARIKHDA DHALASHADA	15-Sep-1985
Date of Birth	
GOOBTA DHALASHADA	QORYOLEY
Place of Birth	
NUMBERKA KAARKA AQOONSIGA	0142070
ID Number	
JINSI	Male
Gender	
XAALADA GUURKA	Married
Marital Status	
DEGGAN	Wadajir
Address	
MAGACA HOoyADA	MARYAN NAXAR SHIBANE
Mother's Full Names	
TARIKHDA LA BIXIYEY	11-Oct-2020
Date of Issue	
SHAQADA	BEERALEY
Occupation	



Right Thumb Print



Duqa Magaalada ee Muqdisho
Mayor of Mogadishu
Cumar Maxamud Maxamed

(Handwritten signature of Cumar Maxamud Maxamed)





JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMALIYA
Wasaaradda Maaliyadda
Waaxda Canshuuraha Barriga
WARQADDA RUQSADA GADIDDA HANTIDA

TIRSI# : 2021 - TRS-091139



Waaxda Canshuuraha Barriga ee Wasaaradda Maaliyadda Waxey Ruqseysay Wareejinta Hantida ay faahfaahinteedu hoos ku xusan tahay:

NOOCA HANTIDA MA GUURTADA AH:

DHUL BANAAN

LOT NUMBER

01064-Q

TITLE DEED NO

WML.11,757/2021 TR.3/04/2021

DEGMADA

Warta Nabadda

CABIRKA

20X15

CIDDA WAREEJINEYSA

SHIINE DAAHIR AXMED XEYD

CIDDA LAGU WAREEJINAYO

TAHLIIL AXMED GUULEED

NOTARY

TIIKEY

NOTARY REF

12,520/2021

QIIMAHA LAGU KALA GATAY

\$15,000.00

Taariikda la bixiyey:

22/06/2021 00:00:00



TRS-091139

Waaxda Canshuuraha Barriga



ORIGINAL
NOOTAAYAHA TIIKEY

UJEEDDO: HESHIIS KALA GADASHO DHUL BANAAN OO MENUICIPALE AH

Muqdisho, Maanta oo ay taariikhdu tahay 03 Bisha April Sanadka 2021 (03/04/2021), Anigoo ah Dr. C/risaaq Maxamed Cabdulle (Tiikey) , Xafiisna ku leh Suuqa Bakaaraha ee Wadada H/Wadaag, waxaa Xafiiska iigu yimid dadka hoos ku qoran ina waydiisteen in aan u kala qoro qoraalka soo socda:-

Anigoo ah Yaxye Cali Maxamuud Maxamed Hooyo Maryan Daa'uud Maxamed Ku dhashay Xamar, 1960 (Iskagade) lehna ID 00133202/Xamar , waxaan qoraalkan aan ku caddeynayaa anigoo dhinac kasta ka caafimaad qaba raalina ah in aan ka gaday kuna wareejiyay Shiine Daahir Axmed Xeyd (Iibsade) Dhul Banaan oo ku yaal Xamar, Deg.W/leey lehna WML26317/2014 Tr. 20/11/2014 Kana soo baxday Nootaayaha Dr.Maxamed C/qaadir Sh.Xasan cabirkiisuna dhan yahay 20X30 Lr.01064,01066-Q sohdimihiisuna kala yihiin , Waqooyi Jid, Galbeed Jid , inta kalana waa Dhul Dad . Waxaana layga siiyay \$20,000 (labaatan kun oo dollar) dhamaan lacagtaas waan wada qaatay. Sidaas darteed wixii ceebaal ah sida dhul Danguud, Dukuminti ka horeeyey dukumintigaan, iyo wixii lamid ah aniga ayaa ka masuul ah. FG. Asalka=Cali Cumar Calasoow (BB/113/26/2003 TR.7/8/2003 Ressid Ir.10376 TR.7/8/2003 Cabirka 40X120 Lotteo Lr.01051 ilaa 01066-Q D.H.X)

Anigoo ah Shiine Daahir Axmed Xeyd , Ina Maryan Naxar Ku dhashay Qoryooley, 1985 waxaan dhankeyga cadeynayaa in aan aqbalay kuna qancay iibkan kor ku xusan isla markaasna aan la wareegay dhulkaan oo dhameystiran.

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1) Mahad Maxamed Bariise

2) Xuseen Cumar Xeyd

3) Maxamed Daahir Axmed







SAXIIXA ISKAGADAHA

Yaxye Cali Maxamuud Maxamed



SAXIIXA IIBSADAHA

Shiine Daahir Axmed Xeyd



Ref.11,757/2021

NOOTAAYAHA(Notary Certification)

Anigoo ah Dr.C/risaaq Maxamed C/le(Tiikey) xafiisna ku leh Suuqa Bakaaraha waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare ku xusan ay yihiin kuwii runta ahaa ee Iskagadaha, Iibsadaha iyo Markhaatiyaasha wehliyey ee sare ku xusan. Dhamaan dadkaas waxay qoraalkaan wada saxiixeen ayagoo xis qaba oo wada raalli ah.

NOTAAYAHA




Dr.C/risaaq Maxamed C/le(Tiikey)




BY.

MASAWIRKA MARKH,1AAD




Mahad maxamed Bariise

MASAWIRKA MARKH,2AAD




Xuseen Cumar Xeyd

MASAWIRKA MARKH,3AAD



Maxamed Daahir Axmed


MASAWIRKA ISKAGADAHA



*Yaxye Cali Maxamuud
Maxamed*

Ref 12.520/2021
Tr. 21/06/2021
20x15
Ln. 01064-Q

MASAWIRKA IIBSADAHA



Shiine Daahir Axmed Xeyd

JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال

SOMALI REPUBLIC


WARQADDA IQOONSIGA

البطاقة الشخصية

IDENTITY CARD



000133202



Magaca / الاسم / Name

**YAHYA
ALI MOHAMUD**



Taariikhda dhalashada / تاريخ الميلاد / Date of Birth

01 OCT 1960

Meesha dhalashada / مكان الميلاد / Place of Birth

MOGADISHU

Taariikhda la bixiyay / تاريخ الاصدار / Date of issue

03 JUL 2013

Lab/Dhaddig / الجنس / Gender

MALE

Form 10

A



Xaashida Sare
ORIGINAL

JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

No. 381374

XISAABIYAHA GUUD EE DOWLADDA

Lacag Qabasho Guud
(GENERAL RECEIPT)

Meesha S.A Taariikh 15-04-2021
 Waxaa laga qabtay yaxye Cali Maxamed Maxamed
 Lacag dhan Sh. Labe Bool Labadan
 Oo ah iy. Afar

FAAHFAAHIN

Madaxa	M-xige	Sh.	Sent
	716102	\$ 200	
		\$ 4	
Saxiixa lacag qabtaha	Isugeyn Guud	\$ 204	
agada			

Dhiibaha Lacagta - Original
 Xis-Guud Dawladda - 2nd COPY
 Buugga A yuu ku Harayaa 3rd COPY



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMALIYA
Wasaaradda Maaliyadda
Waaxda Canshuuraha Barriga
WARQADDA RUQSADA GADIDDA HANTIDA

TIRSI# : 2021 - TRS-084705



Waaxda Canshuuraha Barriga ee Wasaaradda Maaliyadda Waxey Ruqsaysay Wareejinta Hantida ay faahfaahinteedu hoos ku xusan tahay:

NOOCA HANTIDA MA GUURTADA AH:

DHUL BANAAN

LOT NUMBER

01064,01066-Q

TITLE DEED NO

WML 26317/2014 TR 20/11/2014

DEGMADA

Warta Nabadda

CABIRKA

20X30

CIDDA WAREEJINEYSA

YAXYE CALI MAXAMUUD MAXAMED

CIDDA LAGU WAREEJINAYO

SHIINE DAAHIR AXMED XEYD

NOTARY

TIIKEY

NOTARY REF

11,757/2021

QIIMAHA LAGU KALA GATAY

\$20,000.00

Taariikda la bixiyey:

15/04/2021 00:00:00



TRS-
084705

Waaxda Canshuuraha Barriga



(Handwritten signature)



JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO



UJEEDDO:- WAREEJIN MILKIYAD 2-BOOS BANAAN AHNA MUNCIPALLE

Tr. 20/11/2014. Anigoo ah Dr.M/ed C/qaadir Sh.Xasan. Xafiis Nootaayo ahna ku leh magaalada Muqdisho, Inta u dhaxeysa Xarunta Shirkada Isgaarsiinta Telecom Somalia iyo Masjidka Xareed ee wadada H/Wadaag, waxaa ii yimid ayagoo heshiis ah Mudanayaasha hoos ku qoran oo I weydiistey in aan u kala qoro heshiiska wareejin Milkiyad 2-boos banaan oo uu Wiil ka dhaxlay Aabahiis.Fiiri Warqadda Nollo Osto No. 7485.....Tr. 7/11/16.....Ee Wasaarada Maaliyada & Lacagta:-

<u>Magaca Wareejiyaha</u> Hooyo Lehna Aqoonsiga No. Dhashay Dagan	Cumar Cali Maxamuud Maxamed Maryan Daa'uud Maxamed I.D.Card 000026389-Somalia 1974,Kii Xamar	<u>Magaca Loo Wareejiyaha</u> Hooyo Dhashay Dagan	Yaxye Cali Maxamuud Maxamed Maryan Daa'uud Maxamed 1960,Kii Xamar
<u>Maamaha Dhulka Dhaxalka loo Qaatay</u> Degmada Cabirka Lotto No Rasiid No Sabarlog Dowlada Hoose Ee Muqdisho. W.M.L Maxkamadda Degmada Hodon ee Xamar	Wardhiigley 20X30-Mitter 01064-01066-Q 10394 113/26/2003 Taariikh 07/08/2003 Taariikh 07/08/2003 Taariikh 04/01/2004	<u>Soohdinta dhulka</u> Bari Galbeed <u>Lacagta Qiimeynta</u> Kun Dollar American Kaliya Garsoore	Koofur Waqooyi USDollar 1,000.00 Dr. Cabdulqaadir Sh. Xasan Cadde

Cumar Cali Maxamuud Maxamed. Wuxuu wareejiyay milkiyada 2-boos banaan oo uu iska lahaa Aabahiis Marxuum: Cali Maxamuud Maxamed. Geerida Marxuumka oo lagu Sugay Warqada Sugitaan Dhaxalkoob & Wakaalad Qayimnimo No. 87/2014.Tr. 23/02/2014. M.D.X/Wayne ee Xamar. Saxiixay Gudd.Dr. M/uud M/ed Daahir. Wuxuu ku wareejiyay milkiyada dhulkan wiilkii marxuumka oo maanta ka dib iska leh faa'idada & bixinta canshuurta dhulka:Yaxye Cali Max'uud Max'ed.

B. Fiiri Warqada Qeybinta Dhaxalka No. 293/2014.Tr. 20/11/2014. Maxk.Deg. X/Wayne. Saxiixay Gudd.Dr.Max'uud Max'ed Daahir.....

T. Asalka:Cali Cumar Calasow. RL:10394.Tr.07/8/2003.Sabarlog 113/26/2003.Tr.07/08/2003.Cabir 40X120-m. Lotto 01051-01066-Q....

J. Yaxye Cali Maxamuud Maxamed Wuxuu cadeeyay in uu aqbalay la wareegida milkiyada dhulkan banaan ee uu ka dhaxlay Aabihiis.

X

Markhaatiyaasha Beecan:

1. M/ed Xuseen Cabdi(Caddow-Dheere)

2. Mahad Maxamed Bariise.

SAXIIXA WAREEJIYAHA.

Cumar Cali Maxamuud Maxamed


SAXIIXA LOO WAREEJIYAHA

Yaxye Cali Maxamuud Maxamed

XAFIISKA NOOTAAYAHA

REP NO.26317/2014 TR.20/11/2014.MUQDISHO.Anigoo ah Nootaayaha Muqdisho:- Dr.Maxamed Cabdulqaadir Sh.Xasan. waxaan sugayaa in saxiixyada kor ku xusan ay yihiin saxiixyadii dhabta ahaa ee Wareejiyaha milkiyada Dhulka:Cumar Cali Maxamuud Maxamed. Loo Wareejiyaha Milkiyada Dhulka:Yaxye Cali Maxamuud Maxamed. iyo Markhaatiyaasha. Waana laga saxiixay ayagoo raali ah, caafimaad qaba,xiskooduna taam yahay,cid khasbeysana aysan jirin, ka dib markii loo akhriyey qoraalka heshiiskan Wareejinta Milkiyada 2-Boos banaan ee ay loo wareejiyay ka dhaxlay Aabihiis.

NOOTAAYAHA:-
DR.MAXAMED CABDULQAADIR SH.XASAN.



Ref 11.757/2021

Tr. 03/04/2021

20X30

h. 01064, 01066-φ

RECEIPT

Date 7/11/2016

No. RCT-7477-2016

Received From DHAX MARX CALI MAXAMUUD MAXAMED WAK Amount \$ 147.90
CUMAR CALI MAXAMUUD

For Payment of TRS-7485-2016

Received By faatix Paid By [[Cash

PAID

Tax Amount	\$145.00
Stamp Duty	\$2.90
Total Amount	\$147.90



LAM:293/2014.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
MAXKAMADA DEGMADA XAMAR-WAYNE.

UJEEDDO:QEYBIN DHAXAL & AWOOD SIIN. Tr.20/11/2014

MAXKAMADDA HORTEEDA WAXAA YIMID:CUMAR CALI MAXAMUUD MAXAMED. DHASHAY 1974.TII HOoyo: MARYAN DAA'UUD MAXAMED. LEHNA I.D.CARD 000026389-SOMALIA. WAKIIL U AH DHAXALTOOYADA AABIHIIS MARXUUM: CALI MAXAMUUD MAXAMED (XAAJI CALI-DHEERE) FIIRI WARQADA SUGITAAN DHAXALKOOB & QAYIMNIMO & WAKAALAD No. 87/2014.Tr. 23/02/2014.MAXKAMADA DEGMADA XAMAR-WAYNE. GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA DR. MAXAMUUD MAXAMED DAAHIR. & KAALIYE:CIBAADO C/RAXMAAN SH. YUUSUF. DHAXALTOOYADAAS OO AH 4.XAAS & 7.WIIL & 11.GABDHOOD. WUXUU MAXKAMADDA KA HOR CADEEYAY IN DHUL BANAAN OO AY KA DHAXLEEN MAXRUUMKA KOR KU QORAN DHULKAAS OO KU YAAL XAMAR DEGMADA WARDHIIGLEY. GOOFKA LOO YAQAANO GOOFKA REER GUDBAAYE. DHULKAAS OO AH 29.BOOS INAY U QAYBSADEEN DHULKAAS SI WAAFAQSAN SHARCIGA ISLAAMKA. AYADOO UU HELEY WIIL WALBA 2.BOOS GABAR WALBA AY HESHAY 1.BOOS XAAS WALBA AY HESHAY 1.BOOS. DHULKA SOO HARAY EE KU YAAL ISLA GOOFKAAS IN AY KU HESHIIYEEN IN UU IIBIYO WAKIILKOODA KADIBNA AY U QEYBSADAAN LACAG AHAAN. WUXUU KALOO CADEEYAY IN QOF WALBA UU LEE YAHAH DHULKA KU HOR QORAN MAGACIISA.

- | | |
|------------------------------------|---------------------------------|
| 1. MAGACA:YAXYE CALI MAXAMUUD. | 20X30.M.Lotto No.01064-01066-Q. |
| 2. MAGACA:CABDALLE CALI MAXAMUUD. | 20X30.M.Lotto No.01060-01062-Q. |
| 3. MAGACA:CUMAR CALI MAXAMUUD. | 20X30.M.Lotto No.01059-01061-Q. |
| 4. MAGACA:MAXAMUUD CALI MAXAMUUD. | 20X30.M.Lotto No.01056-01058-Q. |
| 5. MAGACA:C/KARIIN CALI MAXAMUUD. | 20X30.M.Lotto No.01055-01057-Q. |
| 6. MAGACA:MAXAMED CALI MAXAMUUD. | 20X30.M.Lotto No.01052-01054-Q. |
| 7. MAGACA:C/RAXMAAN CALI MAX'UUD. | 20X30.M.Lotto No.01051-01053-Q. |
| 8. MAGACA:SEYNAB CALI MAXAMUUD. | 20X15.M.Lotto No.01075-Q |
| 9. MAGACA:RUQIYO CALI MAXAMUUD. | 20X15.M.Lotto No.01076-Q |
| 10.MAGACA:FAADUMO CALI MAXAMUUD. | 20X15.M.Lotto No.01077-Q |
| 11.MAGACA:SAHRO CALI MAXAMUUD. | 20X15.M.Lotto No.01078-Q |
| 12.MAGACA:SAFIYO CALI MAXAMUUD. | 20X15.M.Lotto No.01079-Q |
| 13.MAGACA:MUNO CALI MAXAMUUD. | 20X15.M.Lotto No.01080-Q |
| 14.MAGACA:SUCDI CALI MAXAMUUD. | 20X15.M.Lotto No.01081-Q |
| 15.MAGACA:SAGAL CALI MAXAMUUD. | 20X15.M.Lotto No.01082-Q |
| 16.MAGACA:SAMIIRO CALI MAXAMUUD. | 20X15.M.Lotto No.01035-Q |
| 17.MAGACA:FARDOWSO CALI MAXAMUUD. | 20X15.M.Lotto No.01036-Q |
| 18.MAGACA:SAABIRIIN CALI MAXAMUUD. | 20X15.M.Lotto No.01037-Q |
| 19.MAGACA:FAADUMO MUUDEEY MAALIN | 20X15.M.Lotto No.01071-Q |
| 20.MAGACA:MARYAN DAA'UUD MAXAMED | 20X15.M.Lotto No.01072-Q |
| 21.MAGACA:RUQIYO X.YUUSUF XASAN | 20X15.M.Lotto No.01073-Q |
| 22.MAGACA:RAXMO MAXAMUUD CALI | 20X15.M.Lotto No.01074-Q |

MAXKAMADDU WAXAY SUGEYSAA QEYBINTA DHAXALKA 29.BOOS GOOFKA REER GUDBAAYE UU KU LAHAA MARXUUM:CALI MAXAMUUD MAXAMED (XAAJI CALI-DHEERE) MAXKAMADDU WAXAY AWOOD U SIISAY WAKIILKA DHAXALTOOYADA CUMAR CALI MAXAMUUD. INUU SI SHARCI AH UGU WAREEJIYO QOF WALBA DHULKA KU HOR QORAN MAGACIISA EE UU DHAXALKA U HELAY. SIDOO KALE MAXKAMADDU WAXAY AWOOD U SIISAY YAXYE CALI MAXAMUUD. INUU KU WAREEJIN KARO 2.BOOS UU DHAXALKA U HELAY WALAALKIIS CUMAR CALI MAXAMUUD. WAANA QEYBIN DHAXAL ANSAX AH WAAFAQSAN SHARCIGA ISLAAMKA. MAXKAMADDU WAXAY KU QORTAY BUUGGA GUUD. WAANA LAGA SAXIIXAY DHAMAANTOOD.

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA.

1.MAHAD MAXAMED BARIISE.

2. MAXAMED XUSEEN CABDI" CADDUOW-DHEERE"

SAXIIXA WAKIILKA DHAXALTOOYADA.
CUMAR CALI MAXAMUUD MAXAMED.

SAXIIXA LA SIYAHAA AWOODA 2.BOOS.
YAXYE CALI MAXAMUUD MAXAMED.

KAALIYAHAA MAXKAMADA.
CIBAADO C/RAXMAAN SH.YUUSUF.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADA.
DR. MAXAMUUD MAXAMED DAAHIR.

Galka Utbilding och Utveckling. _____ Tariikda 30/10/2013

Box 5093 16305 Spånga Stockholm Sweden.

Xafiiska Waxbarashada iyo Wax Soo Saarka Ee Soomaaliyeed ee Sweden

UJEEEDO :- WAKAALAD GAAR AHAANEED .

Anigoo ah Fardowsa Ali Mohamud Soomaali ah, hooyadayna la yiraahdo Raxma Maxamud Cali (Fil Fil) ku dhashay xamar 20/10/1997. Degana wadanka Sweden, Haystana kaarka aqoonsiga ee Sweden loogana yaqaano wadanka sweden IDENTITETSKORT lanbarkiiisuna yahay sidan No.9752 2562 154 2124 8909 .

Waxaan qoraalkaan ku caddaynayaa anigoo xis qaba oo ka fayow xaga dhimirka iyo cudur oo dhan raalina ka ah. Inaan wakaalad buuxda u wakiishay walaalkey Cumar Cali Maxamud oo Dagan xamar uuna ka mas'uul yahay hantidayda oo dhan guurto iyo ma guurto iyo waxii dhaxal ah oo aan ka helo hantida aabahey xaaji cali maxamud uu ka dhintay 2004.

